



UJEEDDO:- HESHIIS SAARID INTERLOCK U DHAXEEYA SHIRKADDA DHISMAHA HORSEED INTERLOCK COMPANY & GUDDIGA LOO XIL SAARAY WADAD INTERLOCK GA WADADA XAMAR JADIID EE SAR GADUUD KANA BILAABATA JIDKA 30'KA ILAA JIDKA WARSHADAHAA EE DEGMADA WARTA-NABADA.

Maanta oo ay taariikhdu tahay **19/11/2024** Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa Xafiiskeyga iigu yimid Labada Daraf ayagoo heshiis ah, Waxayna iga Codsadeen in aan u Qoro Warqad Caddeyn Waana Sidatan hoos ku Xusan:-

DARAFKA 1-AAD : HORSEED INTERLOCK COMPANY Ayna Masuul Ka yihiin **1-HASSAN SALAD ALI**, Somali ah Leh, **Somali Pass.l.r.P01027574** Ahna Gudoomiyaha Shirkadda **2-ABDULLAHI YUSUF AHMED** Somali ah Leh , **Somali Pass.l.r.P01027575** Ahna Gudoomiye Ku Xigeenka Shirkadda.

DARAFKA 2-AAD :GUDDIGA WADADA XAMAR JADIID EE SAR GADUUD Gudigaas oo kala ah

1. **CALI CABDI AXMED**,Sita Sita Somali Pass.l.r.P01195189, ahna "Gudoomiye",
2. **ENG SALMAAN MAXAMED MAXAMUUD**,Sita Somali Pass.l.r.P01068616, ahna G. Ku Xigeen
3. **MAHAD CALI MAXAMED**, Sita Somali Pass.l.r.P01110528, (ahna Xubin),
4. **DR C/QAADIR YUUSUF C/LLAAHI**,Sita Somali Driver Licen l.r.59792 (ahna Xubin),
5. **CALI MAXAMUUD IBRAAHIN** Sita Sugnaan No.641064/D/hoose ee Xamar (ahna Xubin)
6. **CABDI C/LLAAHI CIROOBE**, Sita Somali Driver Licen l.r.13157 (ahna Xubin)

Waxayna labada Daraf Ku Heshiiyeen qodobada Soo Socda:-

QEYBTA 1-AAD:

1. In Shirkadda **HORSEED INTERLOCK COMPANY** ay Masuul ka yihiin **HASSAN SALAD ALI & ABDULLAHI YUSUF AHMED** ay dhisto Wadada Xamar Jadiid Ee Sar Gaduud Kana Bilaabata Jidka 30'ka Ilaa Jidka Warshadaha Ee Degmada Warta-Nabada.

2. Wadada La saarayo **Interlock** dhirirkeedu waa 1 kilo Mtr, Ballaceduna yahay 20Mtr, Wadooyinka leexanaya Warta Biyaha ama Godka Biyaha Shan Wado oo Ka Mid ah Wadooyinka Gala Warta Waxaa La Saaraya interlock Si ay u geeyaan Biyaha Godka, Sidoo kale Wadadaan La Dhisayo Wadooyinka uga Leexda Labada Dhinac Waxaa La Saarayaa **Interlock** Waxayna Ka Mid tahay Heshiiskaan.

3. Horseed Interlock Company waxay mas'uul ka tahay muddo 1-Sano ah inaysan wadada biyo fariisad yeelan, sidoo kale shirkadda waxay mas'uul ka tahay in uusan interlock kala bixin farsamo xumo awgeed iyo in uusan burburin.

4. Shirkadda Horseed Interlock Company mas'uul kama ahan wax kasta oo dhibaato ku talagal ah, u keeni karta wadada interlock-geeda inuu burburo sida in biyo xoog ku socdo lagu furo (pressure) ama interlock-ga la baxsado ama la fujisto, ama shirkadaha korontada isgaarsiinta iyo ceelasha biyaha ay dhulka iyo interlock-ga dil dillaaciyaan ama ay Qodaan iyagoo marsiinaya adeegyadooda kala duwan iwm ah, Sidoo Kale Shirkadda Masuul kama ahan Haddii Bulaacado lagu Soo Furo Wadada iyo hadii Boosaneer Wadada Laga Qodo.

5-In interlock-ga wadada la sarayo uu noqdo qaybta dhaxda nooca 8 – cm, qaybta geesahana nuuca 6-cm iyo Miter baante oo ah mid tayo sare leh.

QEYBTA 2-AAD:- Waqtiga:

1- In shirkada Horseed Interlock Company ay dhismaha wadada ay ku dhameeyaan Mudo Afar bil.

2- Waqtiga shaqada waxa ay bilaabanaysaa markii la saxiixo heshiiska oo lana bixiyo Bixinta Kowaad oo ah Boqolkiiba 40 % Sida Ku Cad Habka Lacag Bixinta ee Hoos Ku Xusan Qodobkiisa 4'aad.

Fg- Dhamaan Lacagta Waxaa Lagu Aruurin doonaa Akoonada Shirkadda Horseed Interlock Company.

3- Haddii qandaraasluhu uu dhaafo waqtigii loogu talagaley ogeysiin la'aan iyo cudurdaar la'aan oo qoraal ah, guddigu waxa uu xaq u leeyahay in uu u dacwoon karo Maxakamadda ay khuseyso iyada oo wixii qarashaad ah ee ku baxa dacwaddaasna laga qaadayo dacweeysanaha.



4- Haddii waqti dhaaf ku yimaado wax ku xiran Lacag Bixinta, Qandaraaslahu masuul kama ahan dib u dhaca ku yimaada shaqada iyo waqtiga lagula heshiiyey.

5- Qof kasta oo Dagan Wadadaan La Dhisaayo Waxaa lagu leeyahay Qarashka Ku Soo Aada Mitir ahaan Dhulka uu Dagan yahay.

6- Qofkii bixin waayo qarashka ku baxaya wadada Saamiga Ku Soo aada, Cabirka Gurigiisa, waxaa si wadajir ah u dacwayn doono dhamaan gudiga, maamulka shirkada ee fulinaysa dhismaha wadada iyo Maamulka degmada Warta-Nabada oo bixisay fasaxa shaqada lagu dhisayo wadada.

QEYBTA 3-AAD: QIIMAHA HESHIISKA:-

• Shaqadda dhismaha Wadada Interlock lagu dhisayo waa \$24 dollar "labaatan iyo Afar dollar oo miter iskuweerkii.

QEYBTA 4-AAD:- Qaabka Lacag bixinta:

Lacag bixintu waxay noqon doontaa Seddax Jeer oo kala ah:

1. Lacag bixinta koowaad: maalinta heshiishka la saxiixo waxaa La bixinayaa **40%** oo kamid ah lacagta guud ee lagu heshiiyay Sida Ku Cad Warqada Ku Lifaqaan Dukumintigaan infoyska ah.

2. Lacag bixinta labaad: Waxaa la bixinayaa marka la gaaro Saarista Interlock, waxaana La bixin doonaa **40%** oo ka mid ah lacagta guud ee lagu heshiiyay.

3. Lacag bixinta saddexaad: Waxaa la bixinayaa marka ay dhamaato Saarista Interlock ayna kontorooshaan guddiga, waxaa la bixin doona **20%** oo ka mid ah lacagta ka dhiman heshiiska.

FG. Shirkadda Waxay Shaqada Ku Qabanaysaa Qadarka Lacagta Gudiga uu Soo Aruuriyo Lixda Ruux.

GUNAANAD: Heshiiskan waxaa lagu galay laguna saxiixay Magaalada Muqdisho waxaa laga sameeyay saddex nuqul, nuqul Darafka Kowaad ,nuqul darafka Labaad iyo nuqul xaafiiska nootaayaha, Heshiiskan sidaa ayaa lagu saxiixay kadib markii lawada akhriyay laguna qancay.

SAXIIXA DARAFKA 1-AAD MASUULIYIINTA SHIRKADDA HORSEED INTERLOCK COMPANY.

HASSAN SALAD ALI & ABDULLAHI YUSUF AHMED

 
=**SAXIIXA DARAFKA 2-AAD**=

1-CALI CABDI AXMED,2- ENG SALMAAN MAX'ED MAX'UD,3- MAHAD CALI MAXAMED

4- DR C/QAADIR YUUSUF C/LAAHI,5- CALI MAX'UD IBRAAHIN,6- CABDI C/LAAHI CIROBE

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1-CABDI SACHID SHIRE

2-MAXAMED CABDI CALI


CADDEYNATA NOOTAAYAHA

REP. 1259/T.P.N/24, Tr. 19/11/2024, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- Hassan Salad Ali & Abdullahi Yusuf Ahmed** Ahna (Darafka 1'aad), **2- 1-CALI CABDI AXMED,2- ENG SALMAAN MAX'ED MAX'UD,3- MAHAD CALI M/ED, 4- DR C/QAADIR YUUSUF C/LAAHI,5- CALI M/UD IBRAAHIN,6- CABDI C/LAAHI CIROBE** Ahna Darafka 2'aad) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Cadeyntaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"





**DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
MUNICIPALITY OF MOGADISHU
WARQADDA SUGNAANTA**

Certificate of Identity Confirmation

DUQA MAGAALADA MOGADISHO WAXA KU CADIYSAAYA IN SAWIIRKA VIYO SLEI SAARIDDA
HOOSKE EE MAAMANKU YAHAAY QOLKA HOOSKE XIISAN

The Mayor of Mogadishu hereby certifies that the person whose name and thumb print appears below has the following details:

MAAALAA Full Name	ALI MOHAMUD IBRAHIM
TAXRIIKHDA DHAALASHADA Date of Birth	1980-01-01
GOOBTA DHAALASHADA Place of Birth	MOGADISHU
SIIMBERKA KAYIRKA AQOONSIIGA ID number	1234567890
JINSI Gender	Male
XAAL AHOOWA Marital status	Single
DEGGAAN Address	Mogadishu
MAAALAA AHOOWA Mother's full Name	KADHAYN MOHAMUD IBRAHIM
TAXRIIKHDA DHAALASHADA Date of Issue	2023-10-27
SHARAAFA Occupation	Self-employed



Right Thumb Print

Duqa Magaalada ee Muqdisho
Mayor of Mogadishu
Yuusuf Nuuseen Jimcaale





Daawida Federaalka
Wasaaradda Gaadiidka

Federal Republic of Somalia
Ministry of Transport



13157

Cabdi C/laahi Ciroobe

22/01/2022

Somali

21/01/2025

01/01/1965

M. [Signature]

[Handwritten signature]



59792

Abdiqadir Yousuf Abdullahi

Somali

05/12/1988

Mogadishu

B

25/08/2024

25/08/2029





FOOMKA BIXIN DUKOMINTI

REP:1259/T.P.N/ 2024

Tr,12/01/2025

Magaca qaadaha: →

Meeshuu deganyahay →

Telfoonkiisa: →

Aniga Oo ah Xasan Salaad cali Lehna
Tel:0612271717WaxaanXafiiska Nootaayo
Tayo Ka Qaaday Dukominti Original Ah Oo
Sare Ku Xusan Refkiisa

SAXIIXA BIXIYAHA:

SAXIIXA QAADAHA:

12-1-2025